

B **City of Boston**
c/o Direct Energy
P.O. Box 180
Tulsa, OK 74101-0180

CITY of BOSTON

Presort First Class
U.S. Postage Paid
Boston, MA
Permit #1736

HA FUDUDEYSAN - OGEYSIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN HOOS U DHIGIDA QIIMAYAASHA KORONTADA



Warqadaan waxaa ku jira xogta muhiimka ah oo ku saabsan biilkaaga korontada.

Sibteembar 12ka, 2025

Dariska Qaaliga ah,

Shirkadaada hadda ee korontada waa Eversource Basic Service. Tan ayaa ka dhigan Eversource ay bixiso ayna ku siiso korontadaada. Marka la gaaro Nofeembar 2025, shirkadaada cusub ayaa noqon doonta **Boston Community Choice Electricity (BCCE)**.

WAA MAXAY BCCE?

Boston Community Choice Electricity waa barnaamijka korontada ee Magaallada Boston taasoo siisa korontada xasiloon, qiimaha jaban, ee la cusbooneysiin karo kireysteyaasha, mulkiileyaasha guryaha, iyo ganacsiyada yaryar. Barnaamijka ayaa u sahlaaya Magaallada inay heshiis toos ah la gasho bixiyaasha korontada ayadoo wakiil kaa ah si loo helo badelka Eversource Basic Service. Direct Energy, shirkada hadda bixisa adeegga BCCE, ayaa adeegga korontada siisa dhammaan macaamiisha hadda ka diiwaan gashan barnaamijka ilaa dhammaadka 2027. Inkasta oo Barnaamijkaan uu badelaayo Eversource si uu u noqdo bixiyaha korontadaada, Eversource ayaa sii wadi doonta inay koronto ku siiso bil kastana qarashka kaa dalbato.

Waxa isbadelaaya:	Waxa sidooda ahaan doona:
- Adeegga korontada ayaa ka imaan doona Magaallada Boston asagoo ku imaanaaya adeeg bixiyaha ay qandaraaska kula jirto, Direct Energy. “Qarash Ka Dalbashada CCE-ga Magaallada Boston” ayaa ka muuqan doona biilkaaga ayadoo ah bixiyahaaga korontada. - Qiiimaha adeegaaga korontada ayaa noqon doona Qorshaha Caadiga ah ee Barnaamijka oo ah \$0.14805/kWh muddo hal bil ah kadib waa la dhimi doonaa si looga dhigo \$0.14231/kWh ilaa Diseembar 2027.	- Bixinta korontada, maareynta koontada, iyo qarash dalbashada waxaa samayn doonta Eversource. - Eversource ayaa ka jawaabi doonta xaaladaha degdegga ah, waxay akhrrin doontaa mitirrada waxayna ilaalin doontaa khadadka qaybinta iyo gudbinta. - Waxaad sii heysan doontaa dhammaan xuquuqda macaamiisha jirta iyo ilaalinteeda.

MAXAAN U BAAHAN NAHAY INAAN SAMEEYO?

- **Haddii aadan qaadin wax talaabo ah:** waxaa si otomaatig ah lagaaga diiwaan gelin doonaa qorshaha Caadiga ah ee BCCE, oo ah qorshaha aasaasiga ah ee Barnaamijka, laga bilaabo Nufeembar kadibna **“Billing for City of Boston CCE”** ayaa kasoo muuqan doonta ayadoo ah adeeg bixiyahaaga biilkaaga bisha Diseembar.

Marka koontadaada loo diiwaan gasho mareegta qarash bixinta ee Nufeembar, qiimahaaga korontada ayaa noqon doona \$0.14805/kWh. Heshiiska cusub ee korontada ee BCCE ayaa bilaabanaaya Diseembar 2025. Laga bilaabo mareegtaada qarash bixinta ee Diseembar, qiimahaaga cusub ee qorshaha Caadiga ah ayaa noqon doona \$0.14231/kWh ilaa Diseembar 2027.

- **Haddii aad rabto inaad ka baxdo:** fadlan saxiix oo boostada ugu dir kaarka ka bixida ugu danbayn Oktoobar 16keeda, 2025. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Direct Energy lambarka (855) 402-5868 ama waxaad buuxin kartaa foomka ka bixida oo ku jira boston.gov/bcce. Eversource ayaa sii wadi doonta inay ahaato shirkadaada korontada, waxaadna dhiibi doontaa qiimaheeda, kaasoo isbadellada lixdii bilood ba mar.

Macaamiisha qaata gunnooyinka kaalmada dowladda, oo dakhligooda qoysku yahay ama kayar yahay 60% celceliska dakhliga ee gobalka, ayaa u qalmi kara qiimo dhimis loogu sameeyo qarashkooda korontada. Ka qaybgalka BCCE **ayaan** faro gelin doonin daymanka Eversource, qorsheyaasha lacag bixinta, qiimo dhimisyada, ama kaalmada. Si aad u hesho lacag badbaadin dheeraad ah, u wareeg Aasaaska Ikhtiyaariga ah (oo hadda ah \$0.14205/kWh). Booqo boston.gov/energy wixii macluumaad dheeraad ah.

U wareeg Green 100 (oo hadda ah \$0.17195/kWh), dookh fudud oo qiimo jaban si aad u taageerto tamarta nadiifta ah. Dhammaan tamarta ee la cusbooneysiin karo ee Barnaamijka waxaa laga dhaliyaa aaga New England. Marka aad ku biirto Green 100, waxaad door muhiim ah ka ciyaari doontaa yareynta wasaqda, ilaalinta deegaankeena, iyo ka caawinta Boston si u noqto meel aan kaarboonku ku badnayn. Maanta u wareeg adoo booqanaaya boston.gov/bcce.

QIIMEYAASHA BARNAAMIJKA EE CUSUB

Qiimeyaasha hadda ee lagu heshiiyay ayaa hoos u dhici doona Diseembar. Qiimeyaasha cusub ayaa intaas kadib bilaaban doona oo soconaaya ilaa Diseembar 2027.

DOOKHA KORONTADA BULSHADA EE BOSTON (BOSTON COMMUNITY CHOICE ELECTRICITY (BCCE))				EVERSOURCE
IKHTIYAARI AASAASIGA AH		CAADIGA AH (asalka)		ADEEGGA AASAASIGA AH
Qiimaha	\$0.13661/ kWh	\$0.14231/ kWh	\$0.16248 / kWh	Guryaha la dagan yahay: \$0.14884/kWh C&I Yar: \$0.15150/kWh C&I Dhexe iyo Wayn: \$0.18127/kWh Nalka wadada: \$0.15150/kWh
Muddada	Diiseembar 2025 – Diiseembar 2027			Guryaha la dagan yahay: Agoosto 1, 2025 – Janaayo 31, 2025 C&I Yar: Agoosto 1, 2025 – Janaayo 31, 2025 C&I Dhexe iyo Wayn: Nufeembar 1, 2025 – Janaayo 31, 2026 Nalka wadada: Agoosto 1, 2025 – Janaayo 31, 2025
Xogta Tamarta la cusboonaysiin karo ee 2025 MA Heerka I	27% La cusboonaysiin karo Wuxuu buuxiyaa shuruudaha heerka ugu yar ee tamarta la cusboonaysiin karo ee Massachusetts	42% La cusboonaysiin karo Adds 15% ee MA Class I RECs oo dheeraad ku ah shardiga ugu hooseeya ee gobalka	100% La cusboonaysiin karo Adds 73% ee MA I Class RECs oo dheeraad ku ah shardiga ugu hooseeya ee gobalka	27% La cusboonaysiin karo Wuxuu buuxiyaa shuruudaha heerka ugu yar ee tamarta la cusboonaysiin karo ee Massachusetts
Shuruudaha Bixitaanka	MA JIRAAN GANAAXYO AMA QARASH			MA JIRAAN GANAAXYO AMA QARASH

BCCE ma damanad qaadi karto in lacag kaaga badbaadayso maadaama qiimeyaasha Eversource isbadelaan labo jeer sanadkii. Yoolka isku gayntu waa in lacag loo badbaadsho kaydka inta barnaamijku nool yahay.

*Qiimeyaasha hadda ee BCCE waxaa ku jiras (1) Qarashka Adeegyada Talo bixinta oo dhan \$0.0007/kWh, kuwaas oo la kordhin doono \$0.0008/kWh bisha Diseembar, si loo fududeeyo Barnaamijka; (2) Qarashka Adeegyada Magaallada oo dhan \$0.00011/kWh, oo loo kordhin doono \$0.00034/kWh bisha Diseembar si loo maalgeliyo qarashaadka shaqaalaha ee barnaamijka iyo adeegyada Barnaamijka.

*Qiimaha wuu kordhi karaa haddii uu jiro isbadel ku dhaca sharciga oo keenaya kororka tooska ah, ee kharashyada alaabta inta lagu guda jiro muddada qandaraaska.

SU'AALAHADA BADANAA LA ISWAYDIIYO

- **Waa maxay farqiga u dhaxeeya Bixinta iyo Qaybinta?** Qiimaha adeegga ee ku qoran biilkaaga korontada ayaa ah qiimaha korontada aad adeegsatay intii lagu jiray mareeg kasta oo biilka la baxsho. Qiimaha qaybintu waa qarashka si loo joogteeyo bixinta korontada iyo fiilooyinka korontada qaada oo loo maamulo koontadaada, taasoo ay ku jirto abuurista qaansheegtaada bilaha ah, akhrinta mitirkaaga, iyo bixinta lacagtaada.
Ma dooran kartid cida bixintaa korontadaada laakiin waad dooran kartaa shirkada korontadaada. Badelidda shirkadaada ayaan wax saamayn ah ku yeelan doonin qarashaadka adeeg bixintaada.
- **Tani am saamayn doontaa dheefahayga caawimaada korontada ama qorsheyaasha lacag bixinta?** Maya, waxaad sii wadi doontaa inaad dheefahaas ka hesho Eversource.
- **Horey ayaan u doortay adeeg bixiye qiimo jaban si iskay ah, maxaan sameeyaa?** Waa inaad iskaga baxdaa BCCE si aad iskaga ilaaliso jebinta heshiiska. Waad iskaga bixi kartaa adoo boostada ku celinaaya kaarka lifaaqa ku jira ee ka bixida, buuxinaaya foomka ka bixida ee ku jira [boston.gov/bccea](https://www.boston.gov/bccea), ama wacaaya Direct Energy, oo ah koronto bixiyaha hadda ee Magaallada oo aad ka wacayso (855) 402-5868.
 - ◆ Dadka deegaanka ee door bidaaya in BCCE ay oo noqonaysa bixiyahooda badelka shirkada ay hadda korontada ka helaan ee tartanka nagula jirta waa inay la xiriiraan barnaamijka si loo siiyo caawimaad dheeraad ah.
- **Waxaan haystaa akoon canshuur dhaaf leh, maxaan u baahan nahay inaan sameeyo?** Si aad u sii haysato qarasha bilaa canshuurta ah waa inaad u dirtaa nuqulka [Shahaadada Canshuur Dhaafka Korontada](mailto:Shahaadada Canshuur Dhaafka Korontada@directenergy.com) iimeylka oo ah usn.taxexemption@directenergy.com, fakiska (800) 5400-7428, ama boostada ugu dir Direct Energy Attn: USN Tax Exemption oo ku taala P.O. Box 180, Tulsa, OK 74101-0180.
- **Waxaan haystaa nidaamka soolarka ama soolarka bulshada; ma sii wadayaa inaan helo dhibco?** Waxaad sii wadi doontaa inaad hesho dhibcaha xaasilka ah ee mitirka ama qarashka, qiimaha dhibcahaan ayaana wax laga badeli doonin haddii aad ka qaybgalayso BCCE.

Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo barta oonlaynka ah oo ah [boston.gov/bccea](https://www.boston.gov/bccea), ka wac **3-1-1**, ama iimeylka bccea@boston.gov.



Brian Swett

Madaxa Cimilada | Golaha Deegaanka, Tamarta, iyo Dhulka Banaan

XOGTA TAMARTA LA CUSBOONEYSIIN KARO – Boqoleeyda Qasabka ah iyo tan Ikhtiyaariga ah ee Sanadkiiba

Adeegga Korontada ee Community Choice		Sanadka	Uu doonaayo Gobalku*		Ikhtiyaari**		WADARTA GUUD
			MA Heerka I	Waxyaabo kale	MA Heerka I	Waxyaabo kale	
Korontada Boston Community Choice	CAADIGA AH (caadi)	2025	27%	36%	15%	---	78%
		2026	30%	39%	15%	---	84%
		2027	33%	43%	15%	---	91%
	IKHTIYAARI AASAASIGA AH	2025	27%	36%	---	---	63%
		2026	30%	39%	---	---	69%
		2027	33%	43%	---	---	76%
	IKHTIYAARI GREEN 100	2025	27%	36%	73%	---	136%
		2026	30%	39%	70%	---	139%
		2027	33%	43%	67%	---	143%
ADEEGGA Eversource BASIC		2025	27%	36%	---	---	63%
		2026	30%	39%	---	---	69%
		2027	33%	43%	---	---	76%

*Uu doonaayo Gobalku – Boqoleeyda ugu yar ee qasabka ah ee ilaha tamarta la cusboonaysiin karo oo uu qasab ka dhigaayo sharciga MA.

**Ikhtiyaari – Tamarta la cusboonaysiin karo ee dheeriga ah ee ka badan heerka ugu hooseeya ee gobalku qasab ka dhigaayo sanad gaar ah.

Si aad u hesho faahfaahin dheeri ah oo ku aadan shuruudaha tamarta la cusboonaysiin karo ee MA, fadlan booqo

mass.gov/info-details/program-summaries.



BARNAAMIJKA XULASHADA KORONTADA BULSHADA BOSTON KAARKA JAWAAB-CELINTA KA BIXITAANKA

Haddii aad abto in aad ka qeyb qaadato (Barnaamijka Xulashada Korontada Bulshada Boston) Community Choice Electricity Program, uma baahnid inaad wax tallaabo ah qaadatid. Si toos ah ayaa lagu diiwaangelin doonaa.

Tilmaamaha Ka Bixitaanka

Haddii inaad ka qayb gasho:

- 1) Saxiixa iyo taariikhda
- 2) Geli boqshada lagu siiyay
- 3) Ku soo dir boostada

Kaarka waa inuu saxiixaa macaamilka diiwaanka uu magaciisu ku yaal ciwaanka kaarkan. **Boqshada in lagu soo hagaajiya boostada Oktoobar 16, 2025 si aad uga baxdo Barnaamijka kahor inta aan si toos ah lagaaga diiwaan gelin.**

X _____

Saxiixa

Taariikhda